



Ref: GMDQ/257/2018

Taariikh: Sebtember 20^{ka}, 2018

WAR SAXAAFADEED

Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka isaga oo tixraacaya:

1. warqadda summaddeedu tahay: 122/25/2/B-10/18; taariikhdeeduna tahay Sebtember 08, 2018 kana soo baxday xafiska Guddoomiyaha Golaha shacabka,
2. Qaraarka qabashada doorashada boos-buuxinta Tix Lam: GSH/2315 ee uu ansixiyay golaha shacabku;
3. Hannaanka iyo xeerka hirgelinta doorashadii dadbanayd ee 2016 TixLr. 38

Guddigu wuxuu ku dhawaaqayaa maanta oo ay taariikhdu tahay 20ka, Sebtember, 2018, qabashada doorashada boos-buuxinta kursiga ka bannaan golaha shacabka oo uu banneeyey:

1. Ex. Xildhibaan Dhahar Cali Faarax Dhahar –
Gobalka Sanaa gee Dowlad-goboleedka Puntland

Sidaa darteed; GMDQ wuxuu ku wargelinayaa oday dhaqameedyadii ku jiray liiskii 135ta oday-dhaqameed ee hoggaanka u ah beelaha ay matalaan kursigan, inay soo gudbiyaan liiska 51da ergo-doorasho sida waafaqsan hannaanka iyo qoondada ku xusan diiwaanka soo gubdinta liiska ergada.

Sidoo kale; GMDQ wuxuu ku wargelinayaa odayaasha dhaqanka inay ku soo gudbiyaan liiska ergada muddo 7 cisho gudaheed ah oo ka billaabanaaya 22ka bisha Sebtember 2018 kuna eg 29ka bisha Sebtember 2018. Saacada soo gubdinta liiska waa: 09:00 ka subaxnimo ilaa 03:00 galabnimo oo aysan ku jirin maalinta Jimcada ah.

GMDQ waxaa kale oo u ku wargelinayaa musharrixiinta u tartamaya kuraasigan in qabashada araajida iyo diiwaangelintu ay billaabanaayso 22ka bisha Sebtember 2018 kuna egtahay 29ka bisha Sebtember 2018. Sacadaha qabashada araajidu waa 09:00 ka subaxnimo ilaa 03:00 da galabnimo, goobta qabashadana waa xarunta GMDQ.

Mahadsanid

Xalima Ismacil Ibrahim
Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan
ee Doorashooyinka Qaranka



Tirada erayada waa 234